SOMALISKA

Fasalka diyaargarowga waxa loogu talagalay ilmahaaga

KANI WAA QORAAL KU SAABSAN FASALKA DIYAARGAROWGA

Skolverket

Ilmahaagu wuxu bilaabayaa fasalka diyaargarowga

Qoraalkani wuxu ku siinayaa warbixin ku saabsan fasalka diyaargarowga iyo waxa loogu talagalay ee shaqadiisu tahay.

WAXAAD TAHAY MUHIIM

Waxaad tahay qofka ugu dhow ilmahaaga. Sidaa daraadeed ráyigaagu qiimo badan buu u leeyahay fasalka diyaargarowga. Haddii aad u sheegto fikirkaaga ama ráyigaaga, waxa fududaanaysa in shaqaaluhu siiyaan waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Si aad u awoodo in aad ráyigaaga ka dhiibato, raadna ugu yeelatid waxbarashada ilmahaaga, waxaad u baahan tahay in aad wax ka taqaanid sida fasalka diyaargarowgu u shaqeeyo.

Isku jid baa loo socdaa

Goáanadda khuseeya fasalaka diyaargrowga waxa ku qoran yihiin sharciga iskuulada iyo weliba manhajka waxbarshada iskuulada.

Sharciga iskuulada qaybtiisa/cutubkiisa sagaalaad wuxu ku saabsan yahay fasalka diyaargarowga. Qaybtan waxa ka mid ah waxyaabaha lagu sheegayo. In fasalka diyaargarowgu xiisogeliyo horumarka ardayda iyo waxbarashadooda, una diyaargareeyo sidey waxbarashadooda u sii wadan lahaayeen. Waxbarashada fasalka diyaargarowgu waa in ay ahaataa lacag la, aan, waase laga qaadi karaa lacag yar oo aan dhib ku noqon ardayda. Fasalka diyaargarowga waa in aradaygu ugu yaraan qaataa 525 saacadood, muddo hal sanno ah, kana kooban laba xilli oo kala ah xilliga dayrta iyo kan gu´ga.

MANHAJKA WAXBARASHADA

Dawladu waxa ay hirgelisey manhaj waxbarasho oo cusub, kaas oo soo koobaya manhajka waxbarashada dugsiga hoose/dhexe, fasalka diyaargarowga iyo dugsiga xilliga firaaqada. Manhajkan waxbarashadu waxa uu hirgalay laga soo bilaabo xilligii dayrt 2011.

Dugsiga ardayda laxaadka dhiman iyo dugsiyada ay gaarka u leeyihiin saamarku (waa dad degga waqooyiga wadankan) waxay leeyihiin manhaj waxbarasho oo iyaga u gaar ah, laakiin la mid ah badankiisu ka dugsiyada hoose/dhexe. Ilmuhu wuxu ka dhigan karaa fasalka diyaargarowga iskuuladan aan kor ku sheegnay.

Xitaa dugsiga gaarka u ah ardayda caqliga dhiman wuxu leeyahay manhaj waxbarasho oo u gaar ah laakiin badankiisu u dhigma kan dugsiga hoose/dhexe. Dugsiga gaarka u ah ardayda caqliga dhiman manhajkiisa waxbarasho ma daboolayo ama ma khuseeyo fasalka diyaargarowga.

Labada qaybood ee ugu horeeya miisaan qiimeedka dugsiyada, shaqadooda iyo weliba hadafka guud iyo sharci hoosaadkiisuba waxay khuseeyaan fasalka diyaargarowga iyo dugsiga xilliga firaaqada. Manhajka waxabarashada saddex meelood meel ahaan, qorshaha xiisadaha lagu qaato dugsiyada ma khuseeyaan fasalka diyaargarowga iyo dugsiga xilliga firaaqada, sababtuna waxa weeye waxbarashada labadan dugsi kama koobna casharo iyo dhigista xiisada gaar ah toona. Haddii aad akhrido labada qaybood ee ugu horeeya manhajka waxbarashada waxaad ogaanaysaa waxa aad ka sugaysid iyo waxa aad ka dooni kartid fasalka diyaargarowga. Dhammaanba fasalada diyaargarowgu waa in ay raacaan manhajka waxabarashada.

ILMAHA GELI KARA FASALKA DIYAARGAROWGA

Dhammaan carruurta ku nool Iswiidhan waxay xaq u leeyihiin in ay dhigtaan fasalka diyaargarowga laga bilaabo xilliga dayrta ee ilmuhu buuxinayo lix sanno. Degmada aad deggan tahay waxa waajib ku ah in ay meel siiyaan ilmahaaga. Laakiin adiga iyo ilmahaaga khasab idinkuma ah in ilmuhu tago fasalka diyaargarowga. Ilmuhu wuu dhigan karaa fasalka diyaargarowga inta aanu buuxin lix sanno ka hor, taas macneheedu waxa weeye in ay suuragal tahay in ilmaha loo doori karo in ay dugsiga bilaabaan xilliyo kala duwan. Fasalka diyaargarowgu ilmaha kuma ah waajib ama khasab.

Fasalada diyaargarowga waxa lahaan kara degmada, dawlada, kuwo kalena waxa iska leh shirkado gaar ah. Fasalada diyaargarowga ee degmada waxa ka masúul ah gudi loo doortay. Fasalada diyaargarowga ee gaarka loo leeyahayna waxa ka masúul ah gudi fulin. Fasalada diyaargarowga ee dugsiga ardayda laxaadka dhiman iyo dugsiyada ay gaarka u leeyihiin saamarku waxa masúul ka dawlada.

Sida ay isugu xigxigto waxbarashada aan dhammaadka lahayn

Fasalka diyaargarowgu wuxu awoodaa in uu isku dhexdaro qaab shaqeedka iyo habka waxbarista dugsiga barbaarinta iyo dugsiga caadiga ahba. Taasina waa mid ka mid ah ujeedooyinka fasalka diyaargarowga, siinaysana jiritaan u gaar ah fasalkan diyaargarowga. Halkan waxa ku kulmaya laba meheradood ama laba dugsi oo waxyaabaha qaar iskaga mid ah qaarna ku kala duwan, kuwaas oo ay ka soo dhexbaxayso meherad ama dugsi saddexaad oo marka loo eego carruurta baahidooda ah waxa ugu wanaagsan ee ka soo dhex bixi kara laba dugsi oo kala duwan. Waxa la oran karaa fasalka diyaargarowgu waa buundo u dhexaysa dugsiga barbaarinta iyo dugsiga caadiga ah.

Fasalka diyaargarowga waxa sal u ah dimoqraadiyada. Taas macnaheedu waxa weeye in shaqaaluhu abuuro jawi furfuran oo dimoqraadi ah, kaas oo dareensiin kara arday kasta qiimiisa iyo qiimaha dadka kale.

Fasalka diyaargarowgu waa in uu xiisogeliyo horumarka dhammaan ardayda iyo waxbarashadooda una diyaargareeyo sidey waxbarashadooda u sii wadan lahaayeen, waana in uu gacan ka geystaa sidii hormurkoodu u noqon lahaa mid waafaqsan manhajka waxbarashada. Ciyaar, wax abuuritaan iyo baadhis in lagu sameeyo waxyaabo kala duwan waa qaybaha ugu muhiimsan waxbarashada, waana in la tixgeliyaa xiisaha iyo jacaylka uu u hayo ardaygu in uu wax walba ogaado ama barto. Barbilowgu waxa weeye in horumarka iyo waxbarashadu si joogta ah u socdaan iyagoo u socda qaabab kala duwan.

Waxbarashada fasalka diyaargarowgu waa in ay u suuragelisaa ardayda horumar ku jihaysan ujeedada guud ee manhajka waxbarashada qaybtiisa labaad. Ujeeddooyinkaas guud ee la rabo in ardaygu gaadho waxay khuseeyaan wakhtiga dugsiga hoose/dhexe

oo dhan oo uma baahna in la buuxiyo ama la gaadho marka uu dhamaado fasalka diyaargarowgu, laakiin fasalka diyaargarowgu siyaabo badan ayuu u caawin karaa in horumarka ardaygu gaadho meeshii laga rabey. Dhowr tusaale oo ujeedooyinkaas guud ee laga rabo arday kastaa in uu gaadho markuu ka baxo dugsiga hoose/dhexe wax ka mid ah:

- In uu ixtiraamo xuquuqda iyo qiimaha dadka kale,
- In uu u isticmaali karo af-iswiidhishka qoraal iyo hadalba si buuxda oo ku haboon xaalad kasta,
- In uu u isticmaali karo fekerka xisaabeed sii wadashada waxbarashadiisa iyo nolol maalmeedka caadig ah,
- In uu masúul ka noqdo waxbarashadiisa iyo meesha uu wax ku baranayo.

Fasal diyaargarow kasti wa gaarkiis

Manhajka waxbarashadu waa in uu suurageliyaa in aradaydu helaan waxbarasho fasal diyaargarow oo isku mid ah meel kasta ha degganaadaane. Waxaase suuragal ah in ay kala duwanaadaan qaabka ay u shaqeeyaan fasalada diyaargarowga ee kala duwani. Waxa laga yaabaa in aanay ku haboonayn fasal diyaargarow waxa mid kale ku habooni. Qaabka shaqadu waa in uu ku haboonaadaa ardayda, kuwaas oo aanay kooxina kooxda kale la mid ahayn.

Degmada, dawlada iyo gudiga fulinta ee fasalka diyaargarowga ee gaarka loo leeyahay ayaa masúuliyada ugu saraysa ee fasalka diyaargarowgu saaran tahay. Iyaga ayaad la xidhiidhaysaa haddii dhibaato timaado oo adiga, shaqaalaha iyo maamuluhu wax ka qaban kari weydaan.

Wadashaqaynta guriga

Manhajka waxbarashada waxa ku qoran in macallinka fasalka diyaargarowgu ka masúul yahay in lagula sameeyo iskaashi, oo si joogta ah laguu siiyo warbixinta ku saabsan ilmahaaga xaaladiisa dugsiga, sida uu ugu faraxsan yahay dugsiga, horumarkiisa waxbarasho iyo weliba in uu kula socodsiiyo ilmaaha xaaladihiisa shakhsiyadeed.

Taasina waxay u dhici kartaa qaabab kala duwan, sida warqada usbuuca, kulamada waalidiinta ama qaab kale, laakiin waa in ay suuragal tahay wadahadal maalmeed. Mar kasta waad weydiisan kartaa warbixin ku saabsan fasalka diyaargarowga, waxaadna muujin kartaa xiiso in aad u hayso ilmahaaga iyo fasalka diyaargarowgu qaabkuu u shaqeeyoba. Waxad kale oo aad awoodaa in aad u sheegto shaqaalaha haddii ay dhacaan wax ay muhiim tahay in shaqaaluhu ogaadaan.

Sida ku cad sharciga dugsiyada waa in adiga, ilmahaaga iyo macallinka ilmahaagu aad kulan isku argtaan ugu yaraan sannadkii hal mar, kulankaas oo aad kaga wadahadlaysaan horumarka iyo waxbarashada ilmahaaga. Manhajka waxbarashadu wuxuu wadahadalkiina u noqonayaa taageero.

Vill du läsa hela läroplanen?

Läroplanen bör finnas i alla förskoleklasser. Du kan beställa eller ladda ned läroplanen på Skolverkets webbplats www.skolverket.se

ISBN: 978-91-87115-55-4
Grafisk form: AB Typoform
Foto: Michael McLain
Skolverket 2012

Skolverket